

# Afka hooyo waa af dareen

Waa hab fikirid, dareen, khibrad, jiritaan, dareemid iyo riyeyn.



## CARRUURNIMADA HORE

Luqaddu waxay ku horumartaa isla waqtiga nidaamka xakamaynta dareenka. Sidaas awgeed afka hooyo waxaa loo yaqaan af dareen ama afka qalbiga.

Afka hooyo badanaa waxaa loola jeedaa luqadda uu ilmuhu marka hore barto.

Ku hadalka afka hooyo wuxuu suurageliyaa is-dhexgalka habka ugu qoto dheer uguna dabiicisan.

Aqoonsiga ilmaha wuxuu ku horumaraa afkiisa hooyo.



## GURIGA IYO DEEGAANKA KALE

Afka hooyo guriga ayaa lagu barta xilliyada maalinlaha ah.

Ilmuhu wuxuu af-Finnishka u bartaa luqad labaad ahaan xannaanada iyo iskuulka isagoo la falgalaya saaxiibada iyo shaqaalaha.

Aqoonta wanaagsan ee afka hooyo waxay taageertaa barashada luqadaha iyo xirfadaha kale.

In ilmuhu luqadaha isku qaso waa wax caadi ah, mana aha wax laga welwelo.



## LUQADDA IYO DHAQANKA

Afka hooyo wuxuu ilmaha siinayaa xidid iyo xiriir qoyska iyo dhaqanka.

Ku faan dhaqamada iyo luqadaha qoyskaaga. Waa dhaxal qaali ah oo xoojiya xiriirka dareenka ee u dhexeeya ilmaha iyo waalidka nolosha oo dhan.

Laba-luqadlaha waa hanti, waxayna xoojisaa xiriirka asalka qofka.

Haddii waalidiintu leeyihiin laba af-hooyo oo kala duwan, mid kastaa waa inuu ilmaha kula hadlaa afkiisa hooyo.



## IS-DHEXGALKA

Afka hooyo wuxuu dhisaa oo xoojiyaa xiriirrada bulsheed ee ugu muhiimsan.

Luqadda wadajirka ah waxaa lagu bartaa is-dhexgalka.

Afka dareen ma aha oo keliya erayo – jirka ayaana sidoo kale dareema.

Ciyaarta carruurta way suurtagashaa xitaa luqad la'aan, iyada oo loo marayo tilmaamo, wejiyo iyo ficil.

Ilmaha kula hadal afkaaga hooyo, xitaa haddii ilmuhu kuugu jawaabo af-Finnish.






## XAKAMAYNTA DAREENKA

Af dareen wadaag ah

- ka caawiyaa ilmaha inuu u sheego dareenkiisa iyo baahidiisa waalidka.
- xoojiyaa dareenka amniga.
- dejinayaa falcelinta ilmaha.
- ka caawiyaa ilmaha in la fahmo.
- waxay sahlaysaa in la magacaabo dareenka.

Afka dareenku wuxuu dareenka ka dhigaa kuwo la yaqaan oo ammaan ah.



## TALOOYIN:

Ka amaahda maktabadda buugaag ku qoran afka hooyo oo wada akhriya.

Dhagaysta muusig, sheekooyin iyo barnaamijyo carruur oo ku qoran afka hooyo.

La xiriira qaraabada iyo saaxiibada ku hadla luqaddiina.

## MA KA FIKIRTAY:

luqaddee

- ilmuhu ku ooyaa?
- ilmuhu ku qoslaa?
- ilmuhu kugu maqlaa?
- u doonayaa qalbi dejin?
- ugu fudud inuu ku codsado caawimo?

Tampereen ammattikorkeakoulu · TAMPERE · Pirkanmaan hyvinvointialue · Niitty2

Euroopan unionin osarahoittama

Sawirrada: canva.com
Lifaaqyada: Oma kieli - oma mieli, Opetushallitus 2016